# Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago

engage^ny
Our Students. Their Moment.

## Su'aalooyin Joogto la isu Weydiiyo (FAQ)

Gebi ahaan waalidiinta New York waxay rabbaan in ay inbadan ka ogaadaan Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago. Hoos, waxaad kuheli doontaa su'aalooyin sijoogta ah la isu weydiiyo iyo jawaabo kusaabsan heerarka. Waa lacusbooneysiin doonaa xili walba. Fadlan laxiriir macalinka ilmahaaga ama maamulaha si aad inbadan uga baratid shaqada iskuulka laqabto ee Heerka Lawadaago

**S: Waa maxay Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago?**

**J:** Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago waxay tusiyaan waxa ardadu kahor-K illaa heerka 12aad ay tahay in ay ogaadaan ayna awood uyeeshaan in ay kusameeyaan fanka luuqada Ingiriiska iyo xisaabaadka. Heerarka waxay kucaawin doonaan ardada Gobolka oo dhan in ay bartaan xirfado iskumid ah. Tani waxay xaqiijinaysaa in ay diyaar u yihiin kuliyada iyo shaqada. Heerarka waxaa kamid ah isbedelo, ama "isbedelo," kusaabsan sida macalimiintu u baraan si loogu caawiyo caruurta in ay kuguuleystaan mowduucyada iyo xirfadaha ugu muhiimsan. Heerarka waxaa loodejiyey si loogu caawiyo dadka yar-yar si loogu diyaariyo kuliyada iyo shaqooyinka.

**S. Lahaanshaha Heerarka Lawadaago micnaheeda matahay in qof walba inyar baran doono?**

**J.** Maya. Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago waxaa laga dhisey qaar kamid ah heerarka ugu fiican ee laga soo uruuriyey dhammaan Gobolada wadanka, sidoo kale wadamo kale iyo baaritaan lixaad leh oo kusaabsan waxa la isaga baahanyahay si loogu guuleysto shaqooyinka iyo waxbarasho sare. Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago waxay macalimiinta iyo ardada ay weydiiyaan in ay si qoto dheer u qodaan xirfadaha muhiimka ah iyo fikradaha asaasiga ah ee fasal kasta heerkiisa. Midaana macnaheedu waxay tahay in ardada inbadan kabaran doonaan mowduucyada yar. Sidoo kale midaas macnaheedu waxay kadhigantahay in macalimiintu ay haysan doonaan wakhtiyo baddan oo ay kudaboolaan uguna sharxaan si faahfaahsan maadooyinka. Tani waxay ardada siineysaa fursad ay dhabtii ugu fahmaan waxa ayaga labarey.

**S. Heerarka ma usheegayaan macalimiinta sida ay wax u baraan?**

**J.** Maya. Ayagu waa qalab kucaawineysa macalimiintu in ay u diyaariyaan casharada fasalada sida ugu fiican iyo howlaha. Heerarka sidoo kale waxay caawiyaan ardada iyo waalidiinta ayaga oo tusaya waxa ay qaadaneyso in lanoqdo mid kuguuleysta heer fasal kasta. Waa tub aad muhiim ugu ah macalimiinta, ardada, iyo waalidiinta.

**S: Sidee heerarka loo horumariyey?**

**J:** afartan-iyo lix gobolo ayaa waxay isu keeneen khubaro, macalimiin iyo baarayaal si ay u qoraan Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago, ayadoo ay lajiraan kudhowaad 10,000 faalooyin iyo soojeedin ah, oo ay kamid yihiin in badan oo kayimid macalimiinta iyo waalidiinta New York. New York waxaa lagu dabakhay 2010. Heerarka waxaa sifiican-loola socodsiiyaa fasaladeena waxayna ardadeena kucaawinayaan in ay inbaddan bartaan. Fadlan booqo bogga intarnatka http://corestandards.org/the-standards si aad u akhrisid xaalada heerka oo buuxa.

**S. Tani ma waxay kadhigantahay imtixaano baddan?**

**J.** Maya. Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago kama dhigna imtixaano baddan. Laakin farqi ayaa jiri doona, iyo imtixaano, fiican. Laga bilaabo bisha Abriil 2013, Maamulka Qiimeynta Gobolka New York ayaa tijaabin doona Heerarka Rasmiga ah ee aqoonta ardada iyo xirfadaha loogu talo galay fasalka 3aad illaa heerka 8aad ee fanka maadada luuqada Ingiriiska iyo xisaabta. Imtixaanadaan cusub waxay katurjumi doonaan isbedelada, ama muujin ama "isbedelada," kujira heerarka. Imtixaanaadka waxay xaqiijin doonaan in ardadda ay lakulmi karaan rajooyinka heerarka-fasalka.

**S. Imtixaanaadkan cusub ma adkaan doonaan?**

**J.** Marka hore, laga yaabo in ay u muuqdaan kuwo aad u adag. Tani waa caadi. Imtixaanaadka cusub waxay kusaleysnaan doonaan "isbedelo" kujira heerarka. Wakhtiba wakhtiga kadanbaysa, ardada iyo macalimiinta way laqabsan doonaan rajooyinka cad. Waxaa kaloo jirta suurtagalnimo darajooyinka imtixaanaadka ardada in ay hoos udhici karto ah sanadka koowaad ama kan labbaad ee imtixaanada cusub. Sikastaba ha ahaatee, imtixaanada waa qalab muhiim u ah horumarinta guul gaarida ardayga. Imtixaanada cusub waxay kucaawin doonaan maamulayaasha iyo macalimiinta in ay aqoonsadaan ardada u baahan kara cawimaad dheeri ah si ay si guul ah horey ugu socdaan heerka fasal ee kusoo xiga.

**S. Maxay shaqadaan u tahay ardayda qabba naafo iyo kuwa barta luuqada Ingiriiska?**

**J.** Heerarku waxay macalimiinta kucaawin doonaan in ay haystaan wakhtiyo baddan oo ay kudaboolaan uguna sharxaan si faahfaahsan maadooyinka. Midaana waxay ardaydu siinaysaa fursad ay si dhab ah ugu fahmaan waxa labarey. Waxaa jira hage ama tilmaame cad oo loogu talo galay kudabakhida heerarka dadka barta luuqada Ingiriiska iyo ardayda qabta naafo. Sidoo kale dhammaan gobolada waxay isula shaqayn doonaan si wadajir ah si si joogta ah loogu hormariyo mowduucyadaan. Midaana waxay natiijadeedu noqon doontaa nidaam taageero xoogan oo loogu talo galay dhammaan dadka wax barta.

**S. Maxay Heerarka Gobolka Rasmiga ah ee Lawadaago u tahay ardayda joogta dacalada waddanka?**

**J.** Heerarku waxay dejiyaan filashooyin cad oo kusaabsan waxbarashada ardayga jooga dacalada waddanka. Markii hore, Gobol kasta wuxuu lahaa nidaamka heerarkiisa waxbarasho ee goonida ah. Midaana macnaheedu waxay tahay in ardayda Mareykanka ay baran jireen xirfado iyo fikrado kala duwan oo ah heerar kala duwan. Heerarka Gobolka Rasmiga ah ee Lawadaago waxay siiyaan *dhammaan* ardayda magaalada New York fursad siman oo wax loogu barto isla heerarka sare. Midaana waxay horseedaysaa fursad weyn oo loogu guulaysto kulliyada, shaqada iyo nolosha.

**S: Haddii heerarka kor loo qaado, ma waxaa dhici karta in ay ardayda kacararaan iskuulka?**

**J**: Ma ahan mid ay dhici karto in ay ardaydu kacararaan iskuulka. Baaris lasameeyay waxay tilmaamaysaa in cunsurooyin baddan ay isu kulmayaan kadibna sababaan ardayga in uu iskuulka katago. Sidoo kale baaristu waxay tusaysaa in ardaydu ay rabbaan in iskuulku in baddan lagu xujeeyo. Tusaale ahaan, 7 kamid ah 10 dhalinyarada ahi kuwaas oo kategay iskuulada waxay sheegeen in aysan helin wax rabbitaankooda kiciya ama dhiira geliya si ay aad ugu shaqeeyaan dugsiga sare. Seddexdiiba-labbo oo kamid ah kuwa iskuulada kacarara waxay dhaheen in ay si adag u shaqayn lahaayeen hadii wax baddan laga dalban lahaa (sida filashooyin waxbarasho oo sareysa, wax dhigasho baddan iyo shaqo guri oo baddan).[1]

**S: Matahay kudabakhida heerarka rasmiga ah ee lawadaago fanka luuqada Ingiriiska iyo xisaabta mid xadideysa helitaanka ardayda ay helaan meelooyin maadooyin kale, sida fanka ama shaqada iyo waxbarashada farsamo?**

**J**: Maya. New York way fahmaysaa muhiimmada ay leedahay in dhammaan maadooyinka ay yihiin kuwo ardayda u diyaarinaya guusha kadanbaysa dugsiga sare. Qalanjabinta arday-sifiican u dhisan waxay muhiim u tahay mustaqbalka Gobolka. Heerarka cad ee Muhiimada Lawadaago waxay dhabtii macalimiinta kucaawin doontaa isku darida waxbarida meelaha maadada. Midaana macnaheedu waxay tahay ardayda waxaa lasiin doonaa casharo isu geeya xisaab, seynis, cilmiga bulshada, fanka luuqada Ingiriiska iyo maadooyin kale.

**S: Mayihiin Heerarka Gobolka Rasmiga ah ee Lawadaago kuwo ciqaaba ardayda dhigta iskuulada waxqabadkoodu-hooseeyo ayaga oo sameeya filashooyin macquul ahayn oo sareeya?**

**J**: Maya. Inta baddan, ardayda kujira maanta iskuulada waxqabadkoodu hoosreeyo waxaa loo qabanayaa filashooyin hoose. New York waxay dabakhaysaa Heerarka Gobolka Rasmiga ah ee Lawadaago si *dhammaan ardayda u helaan waxbarasho heer sare ah.*

**Liiska ereyada cusub:**

- Isbedel – Bedel kusaabsan sida macalimiinta wax ubaraan iyo sida ardada wax ubartaan
- Qoraal – Shaqo kasta oo qoran.
- Aan mala- awaal ahayn – Qoraalo kusaabsan dhacdooyinka ama xaqiiqooyinka nolosha-dhabta ah
- Cadeyn – waxyaabo cadeymo ah oo qoran oo laga soo qaato qoraalka
- Doodo – sida ardada qof ugu qanciyaan wax
- Xukun – Gunaanadka ardada ee kusaabsan waxa ay akhriyeen
- Diirad saarid – Inbadan kabarasho mowduucyo yar
- Degdeg iyo Sax – sida deg dega ah ee ardayga ugu xalin karo dhibaatooyinka xisaabaadka si sax ah

**Ilaha:**

- Bilaabida Heerarka Waaweyn ee Rasmiga ah ee Lawadaago: http://www.corestandards.org/
- Guddiga Iskuulada Magaalada Weyn: http://www.cgcs.org
- KaqaybgalkaNY: www.engageny.org
- PTA qaranka ah: http://pta.org

[1] Shirkadaha Wadaniga ah. *Cudurka faafa ee Aamusan: Aragtiyaha kusaabsan Kacararida Dugsiga Sare.* Maarso 2006. http://www.saanys.org/uploads/content/TheSilentEpidemic-ExecSum.pdf